



FAMILY SERVICES OTTAWA  
SERVICES À LA FAMILLE OTTAWA



# Tilmaamaha Khayraadka Aqoonta Maaliyada

EE SHAQAALAHA TAAGEERADA TACADIDA JINSIGA



Macaamiisheenu waxay noo yimaadaan iyaga oo heerar kala duwan oo safarkooda ku jira. Waxa aanu rajaynaynaa in tilmaamahan ay siin doonaan tilmaamo iyo fikiro ay ku taageerayaan madaxbanaanidooda dhaqaale iyo dareenkooda maamulida maaliyada.

**Awoodsiinta Dhaqaale: Aqoonta shakhsi ahaaneed, xirfadaha, iyo kalsooniada ay kaga jawaabaso badqabkeeda dhaqaale.**

Yoolkeenu waxa weeye in aanu siino dumarka iyo qoysaskooda kasoo kabasho dhaqaale, bogsasho, iyo dhismaha amaan dhaqaale oo ay u baahan yihiin si ay u amaan qabaan.



# Walaacyada Waawayn

## XISAABAADKA BANGIGA

- Waxaa muhiim ah in macmiilkeenu uu furto xisaab bangi oo uu leeyahay. Hadii lamaanahedu uu ka qaato kaadhkeeda kaydka ama daynta, waa inay soo sheegtaa in ay wayday ama uu laga xaday.
- **Miyay ku adag tahay inay kharashaadka bixiso?** HA ISTICMAALIN bangiga lacagta kugu leh! Hadii aad dhigato lacagta bangiga kugu leh, bangigu waxa uu la wareegi karaa 100% lacagta kuu taala xisaabtaada hadii ay dhaafto mudada aad ku bixinayso.

**Canada waxa aad xaq u leedahay inaad ka furto xisaab bangi ama urur dayn oo sharcida federalku maamulo hadii aad tusto aqoonsi sax ah.**

### WAXA AAD FURAN KARTAA XISAAB XATAA HADII:

- aad bilaa shaqo tahay
- aanad haysan lacag aad isla markaba dhigato
- aad kacday
- aanad ahayn muwaadin reer Canada ah

- **MA haysatid miyaa aqoonsi sawir leh?** CIBC waxa uu u sahlaa shakhsiyaadka inay furtaan xisaabaad bangi iyada oo ka haysta xaqiijin aqoonsiga macmiilka CIBC waa wanaagu ka dhaxeeyo. Macaamiisha mustaqbalka sidoo kale waxaa looga baahan yahay inay keenaan aqoonsi labaad sida aqoonsiga shaqada, ama kaadhka ATM ee bangi kale.
- Jeega dawlada federalka waxaa lagala bixi karaa bangiga aan lagu lahayn xisaab. Macmiilku waxa uu u baahan yahay aqoonsi sax ah, ama in bangigu uu xaqiijiyo aqoonta macmiilka xidhiidhka wanaagsan ka dhaxeeyo. Jeegu waa inuu ahaadaa wax ka yar \$1500.00.

## LACAG LA WAREEGA AMA XIDHIDA XISAABTA BANGIGA

- Ontario Works iyo ODSP waxaa weeye cadayayaal daymiyaha ah. Waxay tani ka dhigan tahay in cida wax daymisay inayna ku dhagi karin lacagta marka macmiilku uu la habsaamo bixinta lacagta. Hadii cida wax daymisay ay ku dhagto lacagta macmiilkan waxaa looga baahan yahay inuu la xidhiidho bangiga oo uu ka dalbado in la siiyo lacagta oo loogu shubo xisaabta macmiilka.
- Ku dhagida lacagta iyo xidhida xisaabta bangiga ayaa la joojin karaa iyada oo lacagta la kaashanayo hay'ado la taliyayaal ah daynta oo Samofal ah.





## WARBIXINTA KHIYAANADA IYO DAYNTA

Qof kastaa waa inuu qaataa warbixinta daynta hal mar sanadkii si uu u eego khiyaanada ama isticmaalka khaldan ee macluumaadka. Waxa aad heli kartaa warbixin daynta oo BILAASH ah sanadkii hal mar.

Wixii Equifax ah qabo <https://www.consumer.equifax.ca/personal>  
iyo wixii Transunion ah qabo <https://www.transunion.ca/>

Hadii khiyaano aad dareento la xidhiidh cida wax daymisay iyo hay'adaha ka warbixiya daynta.

Digniinta khiyaanada waxaa la gaadhsiiin karaa Transunion iyo Equifax. Tani waxaa weeye kharash bile ah oo waxa ay baajinaysaa in qofna aan lagu qaadan dayn magiciisa isaga oo aan marka hore la waydiin su'aalo badan oo amaan ah oo lagu xaqiijinayo.

## DAYN WADAREED

- Macmiilku waa inuu la hadlaa daymiyaha oo uu xaqiijiyaa hadii dayntu tahay mid wadareed ah ama hadii ay yihiin isticmaale loo ogol yahay. Istimaalayaasha loo ogol yahay caadiyan ma qaadaan khasaaraha daynta.
- Hadii xaaskii/lamaanihii uu yahay isticmaale loo ogol yahay xisaabtooda waa inay la hadlaan bangiga oo ay ka saaraan.
- Qaabka kaliya ee magaca qofka looga saari karo xisaab wadareedku waxaa weeye in daymiyaha, macmiilka iyo cida kale ee la wada daymistay ay isku raacaan. ***Heshiiska is furista iyo kala tegida xaaladan ka khuseeyaan. Xataa hadii lagu sheegey heshiiska, bangigu maaha inuu ka saaro dayn wadareedka.***
- Hadii bangigu uu ogolaado inuu ka saaro macmiilka dayn wadareedka, macmiilka WAA inuu ku helaa go'aankan qoraal oo uu ku haystaa meel amaan ah warqada si mustaqbalka uu u tixraaci karo hadii loo baahdo.
- Hadii macmiilka aan laa saari karin dayn wadareedka, waa inay la xidhiidhaan daymiyaha oo uu XIDHO xisaabta si markaa dayn wadareedku isticmaalkeenu ayna usii socon oo ayna u kordhin baaqiga la isku leeyahay



### Miyay ku adag tahay inay kharashaadka sidii loogu talo geley u bixiso?

Waxa aad kala hadashaa la taliye daynta ah oo shahaado haysta ee hay'ada samofal ah ee latalinta si uu ugala hadlo ikhtiyaarada dayn wadareedka.

# Daynta

## HANTI WADAREERKA

**\*\*Waxa aad doonataa talo sharci jawaab: wixii hanti wayn ah sida guri xaas wada leeyahay, hawlgab, maalgelin, iwm. Hoos waxaa ku qoran ikhtiyaarada lagala hadlayo\*\***

- Libinta guriga xaasku wada leeyahay iyo bixinta daynta guriga
- Ka iibsasho cida la wada leeyahay. Hadii macmiilku aanu haysan lacag waa in loo ansixiyaa daynta
- Cida lala leeyahay inay ka iibsato macmiilka oo markaa macmiilku waxa uu ka baxayaa mulkiyada
- Waxaa muhiim ah in daynta guriga wakhtigeeda la bixiyo. Sadex daynta guriga hadii aan la bixin oo cida wax daymisay waxay bilaabi kartaa xaraashka

## SAMAYSASHADA DAYNTA

**Daynta xun ama bilaa dayn?** Waxa aad ku bilawdaa kaadhka dayta amaanka ah sida Capital One ama Refresh. Waxa aad bixisaa celcelis ahaan \$300 oo waxa aad heshaa xadiga daynta ah ee ah \$300.

Waxa aad kharashka bishii sida biilka taleefanka gacanta, internetka ama haydro ku bixisaa kaadhkaaga daynta bishii. Sidaa waxa aad si joogto ah ugu bixinaysaa wax oo lacagta aad ku bixinaysana waxa ay kuugu jirtaa miisaaniyada oo aad ku wada bixinaysaa.

Hadii aanda ku bixin karin baaqiga hal bil gebi ahaan waxa aad ku dadaashaa in baaqigu uu ka hooseeyo **30%** xadiga la ogol yahay. Hadii uu ka badan yahay baaqigu 30%, waxay u eekaanaysaa in macmiilku uu qabo mushkilad dhaqaale oo waxaa hoos u dhici kara dhibcihiisa daynta

**Waxa aad isku daydaa inaad yeelato kayd bishii ah.** Tani waxay leedahay saamayn wayn marka loo eego daymiyaha. In nafta lasiiyo lacagta marka hore. Xadigu haka go'o si toos mushahar maalinta mushaharka la qaadanayo oo haku dhaco xisaabta kaydka

## DHEERAADKA DHAKHLIGA LA DAMAANAD QAADAY (GUARANTEED INCOME SUPPLEMENT, GIS)

- Waxa uu kordhiyaa dakhlika dadka 65 jirka ah ama ka wayn, ee degan Canada oo waxay qaataan Gunada Da'da Waayeelka (Old Age Security, OAS)
- Waa in la dalbado GIS, maadaama oo aanu qof kastaa si toos ah ugu biirin
- **Kala hadal CRA 1-800-277-9914 wixii macluumaad dheeraad ah ee sida loo dalbanayo**



# GUNOYINKA CASHUURTA DAKHLIGA IYO CASHUURTA ILMAHA

- Gunada cashuurta ilmaha waxaa weeye lacagta oo aan bishii laga jarin cashuurta qoysaska si looga caawiyo kharashka ay ku korinayaan caruurta ka yar 18 jirka
- Xadiga bishii waxaa marka hore loo shubi doonaa qofka ka masuulka ah daryeelka ilmaha. Tan waa la qaybin karaa hadii waalidiinta/koriyayaasha ay kala tageen/is fureen
- Si loo xisaabiyo inta aad heleyso qabo boga CRA  
<https://www.canada.ca/en/revenue-agency/services/child-family-benefits/canada-child-benefit-overview/canada-child-benefit-we-calculate-your-ccb.html>
- Cashuurta dakhliga waa in la geliyaa macluumaadka labada waalid kahor inta aan la helin gunada cashuurta ilmaha. Hadii aad kala maqan tihii oo lamaanahaaga hore aanu gelin macluumaadkiisa cashuurta waxa aad la hadashaa CRA si aad ugu sheegto is badalka xaaladaada guurka
- Hadii labada qofka ka wada masuul yihiin ilmaha, labada dhinacba waxay xaq u leeyihiin in isku mid ah gunada cashuurta ilmaha

## Ma waxa aad u baahan tahay waraaqaha Cashuurtaada?

Waxa aad iska duwaan gelisaa Xisaabtayda Shakhsi Ahaaneed ee CRA si aad u hesho waraaqaha cashuurta sanadadii hore.

Waxay sidoo kale kala hadli karaa CRA

**1-888-863-8662**

**Xarumha dakhliga BILAA cashuurt ah ayaad heleysaa sanadka oo dhan si ay kaaga caawiyaan diyaarinta cashuurahaaga iminka iyo sanada hore**

### JEWISH FAMILY SERVICES OTTAWA

**Luuqadaha:**

Ingiriisi, Faransiis, Carabi, Ruush

**Macaamiisha:**

Dadka haysta deganaanshaha rasmiga ah iyo qaxootiga

**Diyaar garawga cashuur celinta:**

Iminka iyo sanadihii hore

**Cida Lagala Xidhiidhayo:**

Ella Zabarsky

ezabarsky@jfsottawa.com

(613) 769-5056

### CENTRE D'EDUCATION FINANCIERE EBO

**Luuqadaha:**

Ingiriisi, Faransiis

**Macaamiisha:**

Shacabka Guud/Qof kasta

**Diyaar garawga cashuur celinta:**

Iminka iyo sanadihii hore

**Cida Lagala Xidhiidhayo:**

Ange Ningabiye

acningabiye@centre-ebo.com

(613) 746-0400

### INCOME TAX CLINIC PINECREST-QUEENSWAY COMMUNITY HEALTH CENTRE (PQCHC)

**Luuqadaha:** Ingiriisi, Faransiis, Cantonese, Hindi, Mandarin, Nepali, Ruush, Slovak, Vietnamese

**Macaamiisha:**

Dadka ku nool bulshada deegaanka

**Diyaar garawga cashuur celinta:**

Iminka iyo sanadihii hore

**Cida Lagala Xidhiidhayo:**

Isku Duwaha Cashuurta

**Iimeel:**

incometaxcoordinator@pqchc.com

# Meesha loo doonto kaalmo dheeraad ah

Latalin bilaash ah ayaa laga heli karaa hay'adaha samofalka, sida Resolve Credit & Financial Counselling Services. Waxa aad iska ilaalisaa shirkada faa'ido doonka ah ama dhex dhexaadiyayaasha daynta.

## 01 | Xalinta Daynta iyo Adeegyada Dhaqaale (Resolve Credit and Financial Services)

<https://resolvecounselling.org/credit-financial-counselling-services/>  
**1-800-379-5556**

Xalinta Daynta iyo Adeegyada Dhaqaale waxaa weeye hay'ada samofal oo ka caawiya macaamiisha sidii ay u maamuli lahaayeen lacagtooda oo ay u dayn bixi lahaayeen ilaa 1968. Lataliyayasha Daynta ee Shahaadada Haysta waxa ay bixiyaan qiimayn maaliyadeed oo bilaa labaad ah oo BILAASH ah oo waxa ay bixiyaan dhamaan ikhtiyaarada la heli karo si aad ugu socoto qorshaha dayn baxa oo aad u hormarto.

### Adeegyada waxa Kamid ah:

- Ka bixin dayn
- tobobar maaliyadeed oo **BILAASH** ah
- qiimayn onleyinka ah oo **BILAASH** ah
- Waxbarashada Macmiilka oo **BILAASH** ah

### Adeegyada:

- Wada sheekeysii 2 jeer aj maalintii wixii su'aalo sharci ah. Kama jawaabaan looyar, laakiin shaqaale aqoon u leh ayaa ka jawaaba
- Tixraaca kharyaaadka bulshada
- Steps to justice - Waxa aad ka heshaa talo sharci, iyo wax ka badan jawaabaha 600 oo su'aalood
- Guided pathways, waxa ay bixsaa oo ay marka hore sii buuxiyaa foomamka loogu baahan yahay adeeygo sharci oo kala duwan
- Looyarka Pro-bono ee dadka dakhliga sare, ku helitaanka 30 daqiiqo talo sharci

## 02 | CLEO

### Waxbarshada Sharciga ee Bulshada ee bulshooyinka saboolka hoose ee lagana sadbursaday.

Waxay bixiyaan talo sharci ah oo looyar, taas oo si joogto ah loo naqdiyo oo dib u eegid lagu sameeyo si macluumaadka ugu danbaysa loo hayo.

\*This program is funded by the Government of Canada and Women and Gender Equality Canada (WAGE) through the Canadian Women's Foundation.

Family Services Ottawa | 312 avenue Parkdale Ave. Ottawa ON K1Y 4X5  
[info@familyservicesottawa.org](mailto:info@familyservicesottawa.org) | T. 613-725-3601 \*Translated into Somali

